

## ***Tell Them From Me* student survey:**

Information for parents and consent form for parents and carers

### **Ra'yi-baarista ardayga ee *Ayaga Igu Sheega*: Macluumaadka iyo foomka ogolaanshaha ee waalidiinta iyo daryeelayaasha Xarunta Tirakoobka Waxbarashada iyo Qiimeynta**

Waalidiinta iyo Daryeelayaasha Sharafta leh,

Teeramkan, dugsigaaga ayaa ka qaybgalaya ra'yi-baarista ardayga ee *Ayaga Igu Sheega* (*Tell Them From Me*). Cilmi-baaristu waxay na siisaa war-celin qiimo leh oo ku saabsan waxay ardaydeenu ka qabaan nolosha dugsiga, sida looga qaygeliyo dugsiga iyo siyaabaha kala duwan ee bareyaasha iyaga ula dhaqmayaan. Dugsiyada Australia iyo kuwa adduunka kale waxay u adeegsadaan ra'yi-baarista *Tell Them From Me* si ay uga caawiso inay wax horumariyaan. Ra'yi-baarista waxaa lagu dhammeystiraa on-line oo waxaa maamula shirkad cilmi-baaris madaxbannaan, **The Learning Bar**, taas oo ku takhasustay ra'yi-baarisayada dugsiga-ku-salaysan.

Shaqaalaha dugsiyadu **ma** awoodi doonaan inay ka aqoonsadaan shakhsiyadda ardayda jawaabahooda. Si loo hubiyo qarsoodinimada, ardayda ka-qeybqaadata waxay heli doonaan magac gaar ah iyo baasweedh. Halka haddii in ka yar shan arday ay ka soo jawaabaan su'aasha, natiijooyinka waa la xakameynayaa. Ra'yi-baarista waxay caadi ahaan qaadanaysaa 30 daqiiqo ama ka yar si loo dhammaystirona waxaa maamuli doona dugsiga inta lagu jiro saacadaha dugsiga oo caadiga ah. Isla markii ra'yi-baarisayada ay dhammeeyaan ardaydu, warbixinno ayaa laga diyaariyaa badiba xaaladaha waxayna heli karaan dugsiyadu saddex maalmood shaqo gudahooda.

Ra'yi-baaristan waxay ka caawin doontaa dugsigeena inay si fiican u fahmaan sidii loo horumarin lahaa fayoobida ardayda iyo ka-qaybgalkooda. Waxay ka caawineysaa dugsiga inuu ogaado howlaha si loo horumariyo natiijooyinka ardayda.

Ka qaybgalka ra'yi-baarista waa mid ikhtiyaari ah. Ilmahaagu kama qaybgeli doono haddii adiga ama ilmahaagu aanu rabin. Haddii, inta lagu jiro ra'yi-baarista, ilmahaagu uusan jeclayn, isagu/iyadu waxay dooran karaan inay joojiyaan ra'yi-baarista wakhti kasta. Su'aalaha ra'yi-baarista badankood ayaa laga gudbi karaa.

Haddii **aadan rabin ilmahaagu inuu ka qaybqalo** ra'yi-baarista, fadlan buuxi foomka halkan ku lifaaqan una sooceli dugsiga ilmahaaga

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ra'yi-baarista iyo cilmi baarista waxaa laga heli karaa asagoo Ingiriisi ah website-ka Xarunta Tirakoobka Waxbarashada iyo Qiimeynta (Centre for Education Statistics and Evaluation): [education.nsw.gov.au/ttfm](http://education.nsw.gov.au/ttfm)

Maamulaha

# **Tell Them From Me Student Feedback Survey non-consent form**

## **Foomka ogolaansho la'aanta Ra'yi-baarista War-celinta Ardayga ee Ayaga Igu Sheega**

### **Fadlan Ingiriisi ku-buuxi**

Haddii **aadan rabin** in ilmahaaga uu ka qaybgalo ra'yi-baarista war-celinta ardayga, fadlan saxiix foomkan kuna soo celi dugsigaaga

**I DO NOT** give consent for my child/children to participate in the **Tell Them From Me student feedback survey**.

**MA DOONAYO** inaan ogolaansho ilmahayga/carruurtayda inay ka-qaybgaloaan **Ayaga Igu Sheega Ra'yi-baarista War-celinta Ardayga**.

Magaca ardayga 1aad  
Name of student 1

Fasalka ardayga 1aad  
Roll class of student 1

Magaca ardayga 2aad  
Name of student 2

Fasalka ardayga 2aad  
Roll class of student 2

Magaca ardayga 3aad  
Name of student 3

Fasalka ardayga 3aad  
Roll class of student 3

Magaca ardayga 4aad  
Name of student 4

Fasalka ardayga 4aad  
Roll class of student 4

Name of parent/carer

Magaca waalidka/daryeelaha (fadlan qor)

Signature of parent/carer

Saxiixa waalidka/daryeelaha

Date

Taariikhda